

Shuruuradaha U qalmitaanka Cuntada Asaasiga ah: Waxa aad u Baahantahay in aad Oggaatid si aad u Haysatid Dheefahaaga **Basic Food Eligibility Requirements: What You Need to Know to Keep Your Benefits**

Dheefahaaga waa kuwo kuxadidan waqti haddii aadan shaqaynaynin.

Waxaan kuu tixgelinaynaa in aad tahay Qofka Wayn ee Aw ooda Jireed Leh Ee aan haysan Ku-tiirsanayaal (ABAWD) ee loogu talagalay Cuntada Asaasiga ah sababtoo ah adiga w axaad aw oodaa in aad shaqaysid w ax carruur ahna gurigaaga kuma haysatid,

Waxaad qaadan kartaa dheefaha Cuntada Asaasiga ah seddex jeer 36-dii biloodba haddii aadan kasoo bixin shuruudaha shaqada.

Siddee loo haysanayaa dheefahaaga cuntada asaasiga ah

Waa in aad samaysid hal ama ka baddan oo haw lahaan soo socda kamid ah si aad u haysatid dheefahaaga w ax ka baddan seddex bilood:

- Ka buuxi ama ka dhammee shaqada iskaada ah tooska barnaamijka shaqada kumeel gaarka ah bil kasta. Tirada dheeftaada bilaha ah w axay xadidaysaa tirada saacadaha ay khasab tahay in aad samaysid shaqada iskaada ah si aad u haysatid dheefahaaga cuntada.
- Shaqee ugu yaraan 20 saacadood todobaadkii ama 80 saacadood dhexdhexaadkii bishii.
- Kaqayb gal shaqaalaynta gobolka la oggolaaday ama barnaamijka tababarka sida:
 - Shaqaalaynta Cuntada Asaasiga ah iyo Tababarka (BFET). Wixii macluumaad dheeri ah w axaad gashaa boggaan internetka: www.dshs.wa.gov/bfet;
 - Barnaamijyada w axaa lagu daray Hal-Abuurka Aw ooda shaqada iyo Qaanuunka Fursada (WIOA). Wixii macluumaad dheeri ah w axaad gashaa boggaan internetka <https://www.dshs.wa.gov/esa/community-services-offices/wioa>;
 - AmeriCorps VISTA; ama
 - Waddada Ku ficnaanta Ingiriiska Xadidan (LEP).

Caqabadaha hortaaqan kaqayb galka

Nala soo xiriir haddii aadan aw oodin in aad kaqayb qaadatid ugu yaraan 80 saacadood bishii sababtoo ah adiga:

- Waxaad tahay qof jir ahaan ama maskax ahaan naafo u ah;
- Waxaad qaadataa dheefaha ka ahaada Shaqo iyo Warshado (L&I), Maamulka Halyeeyada hore, ama caymis naafonimo khaas ah;
- Aad ku nooshahay xaalad kuu diidaysa in aad shaqaysid, sida guri la'aan muddo-dheer ah;
- Waxaad daryeeshaa qof aanan asagu nafsadiisu daryeeli karin da' ama naafonimo darteeda;
- Waxaad kaqayb qaadataa daaw ayn ku tiirsanaan daroogo ama barnaamij baxnaanis;
- Waxaad codsatay ama qaadataa dheefaha shaqo la'aanta;
- Waxaad ku qorantahay iskuul ugu yaraan maalinta-barkeeda ah; ama
- Waxaad qaadataa dheefaha Caaw imaada Lacagta caddaanka ah ee Qaxootida ama Lacago Deeq U Dhigma.

Waxyaabaha ay tahay in aad soo sheegtid

Waa in aad noo soo sheegtid haddii:

- Aadan dhammayn karin tirada saacadaha kaqayb galka bishii.
- Ay shaqadaadu ka hoos marto 20 saacadood todobaadkii.
- Dakhliga qoyska reerkaaga soo galaya w uu ka baddan yahay xadka ku qoran WAC 388-478-0060.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad baddan oo kusaabsan shuruudaha Qofka Wayn ee Aw ooda Jireed Leh Ee aan haysan Ku-tiirsanayaal boggaan internetka ah www.dshs.wa.gov/abawd.

Naga soo wac lambarkan 1-877-501-2233 haddii aad qabtid su'aalo, u baahantahay caaw imaad laguugu xiro barnaamijka tababarka, ama u baahantahay in aad soo sheegtid isbedelo.

Waxaad naga soo booqan kartaa boggaan internetka ah www.washingtonconnection.org si aad u codsatid dheefaha, usoo dirtid muraajacada, ama usoo sheegtid isbedelada.